**Horace Mann Middle School**
**https://mann.sadiegounified.org**
P- 619.560.4460
Dr. Dulcinea Hearn, Principal
dhearn@sandi.net

# SHARCIGA KAALIFORNIYA EE DHALLINYARO CAAFIMAAD QABO (THE CALIFORNIA HEALTHY YOUTH ACT) – SHARCIGA WAX BARASHADA §§ 51930 - 51939 WAX BARASHADA DHAMMAYS-TIRAN EE CAAFIMAADKA ISU-TAGA IYO KA HOR-TAGA HIV

Friday, October 10th 2025

Waalidka ama Qofka Ardayga Masuulka Ka Ah Ee Sharafta Leh:

Sharciga gobolka Kaaliforniya (California state law), Sharciga Kaaliforniya ee Dhallinyaro Caafimaad Qabo, wuxuu u baahan yahay wax barasho dhammaystiran ee caafimaadka isu-taga iyo ka hor-taga HIV in loosoo bandhigo ardayda ugu yaraan hal mar markay ku jiraan dugsiga dhexe iyo ugu yaraan hal mar dugsiga sare, oona ka bilaabanayso fasalka 7. Degmad dugsi waxaa kale oo laga yaabaa inay bixiso wax barasho dhammaystiran ee caafimaadka isu-taga ama ka hor-taga HIV xili ka horeeyo fasalka 7 oona ka kooban wax barasho da' ku haboon iyo akhbaar caafimaad ahaan sax ah markay noqoto mid kamid ah mawduucyada guud. Xaga raacitaanka wax yaabahaan loo baahan yahay iyo xeerarkaan-degan, Degmada Dugsiga Midaysan ee San Diego waxay soo bandhigaysaa wax barasho dhammaystiran ee caafimaadka isu-taga xaga fasalada 6, 8, iyo dugsiga sare. Sharciga Dhallinyarada Caafimaadka Qabto Ee Kaaliforniya (California Healthy Youth Act), Sharciga Wax Barashada Kaaliforniya oo u dhigma, iyo khayraad kale ee wax barashada waxaa laga heli karaa websaytka Barnaamijka Wax Barashada Caafimaadka Isu-taga: www.sandiegounified.org/SHEP.

Waxay degmada dugsigeena isticmaali doontaa manhajka *Xuquuqda, Ixtiraamka, Mas'uuliyada* uu ogolaaday Guddiga Wax Barashada, waxayna u isticmaali doontaa hab ku salaysan fasalka oo si toos ah. Waxaa wax barashada la bixin doonaa inta lagu jiro waqti uu go'aamiyey iyo uu kuu sheegi doono macalinka cunugaaga.

Waxaa wax barashada intarnetka laga hirgelin doonaa keliya gudaha dugsiyada wax barashada madax banaan oo inta badan isticmaalo wax barashada intarnetka. Hadii lagu bixiyo hab wax looga baranaayo intarnetka, waa muhiim inay qoysaska hubiyaan inay:

- Ardayda haystaan qalabka wax lagu dhageysto ama meel gaar ah oo ka fog caruurta yaryar si ay oga qayb-qaataan casharadaan.
- Ardayda duubin ama qaybinin wax ka mid ah qalabka wax barashada ama waxyaabaha la baraayo iyagoo aan haysanin ogolaanshaha macalinkooda.

Waxyaabaha la baraayo ardayda waa diyaar oo waxaa fiirin karo waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda waxayna ka fiirin karaan dugsiga ama intarnetka. Si laguugu soo bandhigo fursad aad heli karo oo aad ku fiirin karto waxyaabaha la baraayo ardayda, waxaa laga yaabaa in cunugaaga dugsigiisa u soo diro qoysaska soo badhig oo ku saabsan manhajka intarnetka oo horey loo duubay (waxaa sidoo kale laga arki karaa inta). Sidoo kale waxaad ka fiirin kartaa waxyaabaha la baraayo ardayda bogga intarnetka ee manhajka SHEP ee loo yaqaano SHEP Curriculum webpage.

**Fadlan ogoow inay waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah ardayda ka fasixi karaan cunugooda wax barashada caafimaadka la xiriiro galmada oo sannad dugsiyeedkaan iyagoo u maraayo inay cunugooda macalinkiisa u soo bandhigaan warqad ama qoraal elektaroonik ah, ama la soo daabacay, ama gacan lagu qorey oona ku qoran luuqada ay jecelyihiin. Waa in si fudud loogu sheegaa warqada inay ka fasaxayaan cunugooda wax barashada, waana inay ku qoraan magaca cunugooda, iyo waa inuu qoro**

**Horace Mann Middle School**
**https://mann.sadiegounified.org**
P- 619.560.4460
Dr. Dulcinea Hearn, Principal
dhearn@sandi.net

**ama saxiixo waalidka ama qofka mas'uulka ka ah ardayga. Ma loo baahno in wax sabab ah lagu sheego warqada.**

Waxay Kaaliforniya u baahan tahay inay wax barashadaan tahay mid ay kuli ardayda u dhan yihiin, inay ku dhiiri-geliso ardayda inay kala hadlaan waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah dareenka la xiriiro isu-taga ee dadka (human sexuality), iyo inay u soo bandhigto ardayda cilmiga iyo xirfadaha ay u baahan yihiin inay dhistaan siyaabo dhaqan oo caafimaad leh oo khuseyso koritaanka iyo horumarka ardayda da'da qaan-gaarka. Sidaa darteed, waa inay mawduucyada soo socda ku jiraan iyo wey ku jiraan manhajkeena:

- Akhbaar ku saabsan HIV iyo jeermiska cudurka dhaliya ee kale oo la iskugu gudbiyo isu-taga dadka (STIs), oo ku jiro gudbinta, hababka ay ogashahay FDA oo looga hortago HIV iyo STIs, iyo dhaawaynta
- Akhbaar in ka-dheeraadka (ama iska-dhaafka) uu yahay halka wado la hubo oo looga hortagi karo uur aan lagu tala gelin, HIV, iyo STIs kale, iyo akhbaar ku saabsan qiimaha daahitaanka waxqabadka isu-taga
- Wada hadal ku saabsan aragtida bulshada ay ka qabto HIV iyo AIDS
- Akhbaar ku saabsan jinsiga, nooca jinsiga, iyo wax-yeelka fikradaha aan fiicnayn oo laga aamini karo jinsiga qofka
- Akhbaar ku saabsan wada xiriir caafimaad ku dhisan iyo xirfadaha looga fogaado akhlaaqda iyo xaaladaha caafimaadka daran

Waxaa dheeraad ah, wax barashada fasalka 8 iyo dugsiga sare waa inuu ku jiro wuuna ku jiraa:

- Akhbaar ku saabsan helitaanka khayraad loogu talagalay daryeelka caafimaadka isu-taga dadka iyo taranka
- Akhbaar ku saabsan uurka, oo ku jiro hababka ka hortaga ay ogashahay FDA iyo fursadaha uurka

Wax barashada waxaa bixin doono macalimiinta galaasyada ee degmada dugsiga ama kuwa ka socodo wakaalado caafimaad oo ku tababaran manhajka. Wakaaladahaan caafimaadka waxaa ku jiri karo Family Health Centers of San Diego, Planned Parenthood, iyo San Ysidro Health Center.

Si daacad ah,

Dr. Dulcinea Hearn, Principal